# TALLAALKA LOOGA HORTAGO JEERMISKA-QUMANKA, JEERMISKA-TEETANADA, JEERMISKA-XIIQ DHEERTA, DABEYSHA, CUDURKA HIB IYO JOONISKA/CAGAARSHOWGA B

**Jeermiska-qumanka**

waa cudurka sanka iyo dhuunta oo uu sababo jeermiska qumanka. Jeermiska wuxuu abuuraa sun oo weerari karto wadnaha, kilyaha iyo xididada jirka. Cudurka waa la dili karaa. Xiligii lagu gudo jiray iyo ka dib Dagaalkii Labaad ee Aduunka, waxaa ka jiray Norway jeermiska-qumanka ee faafo. Ka dib markii tallaalka lays baray 1952 dii, dhoor dacwadood oo cudurka ah kaliya ayaa dhacday cudurka dibada ka dib. Jeermiska-qumanka wuxuu sii waday in uu ka dhaco qeybo Yurubta ah iyo qeybo kale oo aduunka ah.

**Jeermiska-teetanada**

Waxaa keeno jeermiska laga helo ciida. Cudurka wuxuu imaan karaa goortii jeermiska uu gaaro dhaawaca. Cudurka lagma qaado qofka qaba. Jeermiska wuxuu abuuraa sun oo soo weerarto xididada jirka iyo waxay sababtaa murqo xumi iyo xanuun maroojin ah. Cudurka aad ayuu dilaa u yahay. Wuu ku yar yahay wadamada waqooyiga Yurub halka uu kaga badan yahay gobalada cimilada kulul.

**Jeermiska-xiiq dheerta (xiiq-leey)**

Waa (isbuucyo 6–12) oo cudurka neefsiga uu aad ugu dhaw yahay qufaca. Jeermiska-xiiq dheerta wuxuu keeni karaa waxyeelo maskaxda ah sababtoo ah oksijiin la'aanta xiliga qufaca ku haboon, iyo dacwadaha marmarka dhaco waa dhimasho. Waxay u noqon kartaa halis carruurta yar, gaar ahaan ilmaha. Si carruurta iyo dadka waaweyn, cudurka wuxuu noqon karaa waqti dheer iyo wuxuu dhibaateyn karaa, laakin halista nolasha waa dhif. Cudurka aad ayuu u faafaa – ku dhawaadkii 100 % oo dadka ah way qabaan cudurka inta aanan bilaaban tallaalka.

**Dabeysha**

Cudur faayruska oo sida caadiga ah sababo aastaamaha sida-qabowga, kor cuncunka iyo shubanka. Wuxuu sababi karaa caabuq fadhiga maskaxda (caabuqa jeermiska) iyo wuxuu keeni karaa naafo nimo joogta ah. In loo dhintana way dhacdaa. Inta uusan tallaalka imaanin 1957 tii, waxaa jiray cudurka dabaysha faafo oo sanadle ka ah Norway oo boqolaal carruur iyo dhaliinta qaangaarka oo ay si toos ah u naafoobaan. Ilaa 10 % way dhintaan. Tallaalka markii la keenay ka dib, cudurkii wuxuu noqday mid ka xakameysan Norway iyo wadamo kale. Yurub waxay ku dhawaaqday in ay cudurka dabeysha ka xurowday 2002, laakin cudurka weli wuu ka dhacaa dhoor wadan oo Afrika iyo Asiya. Dadka aan la talaalin way saameyn kartaa goortii ay safraan iyo way sii qaadsiin karaan dadka kale oo aan ka tallaalneen ka dib goortii ay yimaadaan wadanka.

**Cudurka hib**

Jeermiska nooca Jeermiska (Hib) wuxuu ahaa tan mar walbo sababo caabuqa fadhiga maskaxda (caabuqa jeermiska) oo carruurta qaar ee ka yar 5 sano ee ku nool Norway inta aan la helin tallaalka. Hib waxay sidoo kale keeni kartaa dhaawacyo halis ah sida wareentada, barrarka iyo dalqada. Talaalka markii la keenay ka dib 1952 dii, cudurada Hib ku dhawaadkii kama jirin Norway.

**JOONISKA/CAGAARSHOWGA B**

waa caabuq ku dhaca beerka oo sababtu tahay faayruska jooniska/cagaarshowga nooca B. Faayrusku wuxu ku jiraa dhiigaa iyo dheecaannada jidhka ee dhiig ku jiro. Ma ka dhex bixi karto maqaarka dhammaystiran. Waxa lagu kala qaadaa xuub-xabeeddada ama maqaarka dhaawacan, tusaale ahaan mudista irbad dhiig leh, dhiiga qofka lagu shubo ama galmoodka. Haddii hooyadu qabto cudurkan waxa ilmuhu qaadi karaa xilliga uu uurka ku jiro iyo xilliga uu dhalanayo.

In ka badan 90 % carruurta qaada cudurkan waxa ku dhacaya infekshan joogto ah oo waxay noqonayaan faayruus-sidde haddii aanay helin daaweyn ka hortag ah. Halista noqoshada qof si joogto ah u sidda waxay sii yaraanaysaa marka ilmuhu koro, waxaanay ka yartahay 5 % marka qofku uu qaado isagoo ah qof weyn. Sababtoo ah nuglaan ku jirta difaaca jidhka ee dadka qaba Down-syndrome waxa ay noloshooda oo dhan halis weyn ugu jiraan inay si joogto ah u siddaan jooniska/cagaarshowga B haddii ay cudurkaas qaadaan.

Siddista joogtada ah waxay keeni kartaa beer-xanuun am akansarka beerka. Dadka siddayaasha ah ayaa sida kale ah meelaha ugu horeeya ee laga qaado jooniska/cagaarshowga B. Taas darteed waxa muhiim ah in la yareeyo siddayaasha cusub ilaa inta la kari karo.

Carruurta ay dhaleen hooyooyin sidda faayruska jooniska/cagaarshowga B waxa marayaan barmaamij tallaal oo u gaar ah oo la bilaabayo 24 saacadood gudahood marka ay dhashaan. Haddii hooyadu ogtahay inay siddo faayruska, waxa muhiim ah inay u sheegto kaalkaalisada xarunta caafimaadka carruurta (helsesøster).

## TALLAAL LIXDA QEYBOOD AH OO LOOGA HORTAGO JEERMISKA-QUMANKA, JEERMISKA-TEETANADA, JEERMISKA-XIIQ DHEERTA, DABEYSHA, CUDURKA HIB IYO JOONISKA/CAGAARSHOWGA B

Tallaalka looga hortago jeermiska-qumanka iyo jeermiska-teetanada wuxuu ku saleysan yahay sunta jeermiska uu abuuro, laakin saameynta sunta waalaga saaray. Tallaalka jeermiska-xiiq dheerta waxay wadataa qeybo la sifeeyay oo jeermiska-xiiq dheerta. Tallaalka dabaysha waxay wadataa dilaaga faayruska dabeysha oo sadexda nooc oo u keeni karo aadanaha cudur. Tallaalka Hib wuxuu wataa qeybo ka mid ah kaabsolka sokorta jeermiska (polysaccharide) oo isku jirka borotiinka ah. Tallaalka jooniska/cagaarshowga B waxa ku jira qaybo ka mid ah faayruskaa jooniska/cagaarshowga B. Ma jiraan qeybo tallaalka ah oo nool.

Markii sadex garoojo sida loogu tilmaamay barnaamijka, carruurta waxay haystaan ka hortaga joogtada oo cudurka Hib iyo jooniska/cagaarshowga. Cudurada kale, garoojooyinka xoojiya ayaa looga baahanyahay oo la siiyo goortii canuga uu gaaro da'da dugsiga.

*Saameynta-dhinaca guud:*

Nasiinyo la'aanta, xanaaqa, oohinta, aan dareemeyn fiicnaan, hurdo la'aanta, cunto yarida ama dareenka xanuun oo 1–2 maalmood ah ka dib markii tallaalka uu ku dhaco ilaa 1 oo 10 kii qof oo dadka la tallaalay ah. Xaaladaha qaarkood way adagtahay in la ogaado hadii aastamaaha ay yihiin sababta tallaalka ama wax kale.

Gaduudashada, barrarka, xannuunka oo dhinaca tallaalka ah sidoo kale waxay ka dhacdaa ilaa 1 oo 10 ah ka dib markii tallaalka iyo waxay gaari kartaa dhoor maalmood. Badanaa, dareemaha xannuunka marmarka dhaco.

Qandhada kooban oo dhacdo ilaa 1 oo 10 qof oo horay loo tallaalay ah. Inka yar 1 oo 100 waxay qabaan qandho ka weyn 39,5 °C. Dacwado noocaas, waa in dhaqtar lala xiriiraa sababtoo ah qandhada waxay keeni kartaa sababo kale oo u baahan daaweyn.

## TALLAAL AFAR-QEYBOOD AH OO LOOGA HORTAGO JEERMISKA-QUMANKA, JEERMISKA-TEETANADA, JEERMISKA-XIIQ DHEERTA IYO DABEYSHA

Tallaal isku dar ah oo laaga hortago jeermiska-qumanka, jeermiska-teetanada, jeermiska-xiiq dheerta iyo dabeysha  waxaa loo bixiyaa sida garooja xoojiyaha ah da'da hore ee dugsiga, sida caadiga ah fasalka 2. Ka hortaga wuxuu yareeyaa waqti ka dib iyo garoojada xoojiyaha waxaa lagu bixiyaa fasalka 10.